# Qorshaha Adeegga – Waad sheegteen Waan sameynay! Somali

| | Waad Sheegteen! | Waan Sameynay! |
|---|---|---|
| **Nidaamka Boos Qabashada** | • Habab kala duwan oo boos qabasho (telefoon/ iimayl) | • Madal khadka internetka ah oo bar kaliya laga soo galo<br>• Taageero Telefoon / Khadka internetka ah |
| **Tababarrada** | • In tababar wacyigelinta dhaqammada ku saabsan loo sameeyo soo dhoweyayaasha<br>• Tababar wacyigelinta dhegoollada ku saabsan oo loo sameeyo hawlwadeenada soo dhoweynta iyo bukaan-jiifta<br>• Sii hagaajinta duubista luqadaha loo baahan yahay oo ay lahjaduhu ku jiraan | • Waxaa hawlwadeenada loo bilaabayaa tababar xoojin ah oo ka kooban sida adeegga lagu helo, sida adeeggu u shaqeeyo, cidda adeegga isticmaali karta, baahida duubista luqadaha, sharafta, ixtiraamka, wacyigelinta baahida gaarka ah (sida: dhegoollada) iyo midda dhaqan<br>• Sameynta hagaha hawlwadeenka uu qof walba heli karo, taageerada bixiyuhuna ay la socoto |
| **Shahaadooyinka iyo khibradaha turjumaha** | • In turjumaanada tababarro fiican loo sameeyo oo shahaadooyinkooda la hubiyo<br>• Shahaadooyinka iyo khibradaha (oo ay ku jiraan ka shaqaynta xarumaha caafimaad) ee turjumaanadu waa kala duwan yihiin (bixiyayaal kala duduwan) | • Shahaadooyinka, kartida iyo khibradda la isaga baahan yahay ayaa lagu faahfaahiyay tusmada cusub, si joogto ah ayaana loo kormeeri doonaa si kalsooni loo abuuro |



A joint review by: NHS Lambeth, Lewisham and Southwark Clinical Commissioning Groups

# Qorshaha Adeegga – Waad sheegteen Waan sameynay! Somali

| | Waad Sheegteen! | Waan Sameynay! |
|---|---|---|
| **Waqtiyada** | Isniin – Jimce 8am – 6pm | 8am – 8pm, 7 maalmood toddobaadkii |
| **Waqtiyada boos qabashada/sugidda** | Way kala duwan yihiin, waxay ku xiran tahay nooca boos qabashada sida; BSL waxay rabtaa 5 maalmood, F2F waxay rabtaa 2 maalmood iwm. | Helitaan isu dheellitiran oo dhammaan baahiyaha turjumista ah, iyadoo lagu kabayo tiknoolajiyadii ugu dambaysay |
| **Wacyigelinta** | Bukaanada iyo hawladeenada xaruntuba kama warhayn adeegyada jira sida; F2F, BSL iyo Telefoonka | • Qalab suuqgeyn iyo isgaarsiineed oo loogu talogalay dadka adeegga isticmaala oo dhan<br>• Wakiillo ka socda isticmaalayaasha adeegga ayaa horumarinta adeegyada laga qaybgalinayaa |
| **Turjumaan fiidyow** | • Qayb kama aha nidaamka adeeg ee hadda jira<br>• isticmaalayaashu waxay walaac ka qabeen helitaanka qalabka iyo xiriirinta<br>• 70% isticmaale ayaa isticmaali lahaa | Waxaa lagu daray qorshaha cusub iyadoo qayb ka ah  horumarinta joogtada ah ee adeegyada |
| **Waayoaragnimada isticmaalaha** | Adeegga hadda jira si joogto ah looguma uruuriyo waayoaragnimada isticmaalaha | • Ra'yi celin isticmaale oo joogto ah ayaa la uruurinayaa si gacan looga geysto hagaajinta adeegga hadda la  fidiyo<br>• Habab cusub ayaa la hirgelin doonaa si loo daboolo baahiyaha isticmaalaha adeegga |